



Federal Republic of Somalia
Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management
The National Multi-Hazard Early Warning Center

DIGNIIN !

CABSI LAGA QABO FATAHAAD HIRAR IYO DABEYLO



MUQDISHO, Soomaaliya, 05ta Ogosto 2020 – Roobab, Hirar iyo Dabeylo ayaa la filayaa in ay ku soo wajahanyihiin qeybo ka mid ah dalka.

Roobab xooggan ayey saadaasha **toddobada casho ee soo socoto** tilmaamaysaa in ay ka da'idoonaan qeybo ka mid ah **Goballada Koofureed** iyo kuwa **Woqooyi** ee dalka. Sidoo kale Roobab ka da'aya **buuralayda Itoobiya** ayaa laga cabsi qabaa in ay sabab u noqdaan sare u kaca heerka Webiga **Shabeelle** iyo **Jubba** taasi oo ay ka dhalan karto fatahaado ka dhaca Magaaloyinka ku hareereysan Webiga sida **Jowhar** iyo **Baladweyne**.

Heer cabbirka **Webiga Shabeelle** ee uu hadda marayo ayaa saameeyay isu socodka gaadiidka iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga ee Magaalada **Jowhar** ee Gobalka **Shabeellada dhex**. Degmada **Afgooye** oo ay dhawaan saameeyeen roobabkii xagaaga ee aan horey uga dignay ayaa waxaa laga cabsi qabaa in ay mar labaad saameyn ku yeeshaan roobabka la filayo in ay da'aan toddobada cisho ee soo socda, iyadoo wabigu horey u buuxay.

Mowjadaha iyo Hirarka Badda: 7-12 Bisha **Ogosto** waxaa la saadaalinayaa in Mowjadaha **Badda** ay sara u kacayaan taas oo sababi karta in ay wax yeelo naf iyo maalba leh u gaysato dadka ku shaqeysta doonyaha yaryar iyo dadka dalxiiska u aada xeebaha; sidoo kale waxay waxyeelo u geysan kartaa dadka ku nool nawaaxiga badda.

Dabeylaha Xagaaga xaalada dabeysha ayaa markasta is badbadaleysa sidaas darteed waxaa laga cabsi qabaa in maalmaha soo socda ay sara u kac ku yimaado Xawaare-socodka dabeysha.

Xarunta Qaran ee Ka digista Halis-wadareedka (NMHEWC) waxay si gaar ah uga digeysaa dhammaan bulshooyinka kala duwan sida; dadka ku nool hareeraha **Wabiyada Shabeelle** iyo **Jubba**, **kaluumeysatada** iyo dadka ku dhaqan degaannada dhaca **Xeebaha** in ay ka digtoonaadaan khataraha ku soo wajahan.

Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka (WG&MM) waxey ugu baaqeysaa dhamaan maamulladda deegaanaddaas kor ku xusan iyo dhammaan hey'adaha gargaarka ee ka hawlgala deegaannadaas in ay u diyaar garoobaan xaaladdan soo cusboonaatay, ayna taageero u muujiyaan bulshada ku dhaqan xeebaha iyo deeganada barriga ah.

Xarunta waxey si dhaw ula socotaa is badalka xaaladaha , waxeyna idiin soo gudbineysaa waxa soo kordha iyo sida ay isubaddesho xaaladda.

DHAMMAAD

Si aad Macluuumad dheeraad ah u hesho, fadlan la xiriir: Ahmed Omar, Madaxa Xiriirka iyo Xogaha guud, communications@mohadm.gov.so, Tel. +252 615578678.